



**Jamhuuriyada Somaliland**  
**Golaha Wakiilada JSL**



**Warbixinta**

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

*21 Dec-2013-17 Feb 2014*

*April 2014*

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

**Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.]**

**Ujeedo:- Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

*Mudanayaal*

Si aynu u qorshayno hawlaha **kal-fadhiga 24<sup>aad</sup>** ee Golaha Wakiilada una dardar galino una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanayna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 23<sup>aad</sup> oo dhamaystiran si aad u xasuusataan wax yaabihii inoo qabsoomay iyo wixii aan inoo qabsoomin.

**Ajandaha Kalfadhiga 23<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada.**

**21/12/2013**

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

<b>No.</b>	<b>Magaca Xeerka</b>	<b>Marxalada aa u marayo</b>	<b>Cida Gacanta ku haysa</b>
1.	Qorshe Hawleedka Golaha <b>(Strategic plane ) 2013-2015</b>	Akhriska 1aad	Gudi gaar ah Dr. Ali Yusuf
2.	Xeerka ka Gacansiga Hawlaha BangiyadaJSL	Akhriksa 1 <sup>aad</sup>	Gole Weynaha
3.	Xeerka Xabsiyada	Akhriksa 1 <sup>aad</sup>	Gudida Shurucda
4.	Xeerka Caasmiada	Mooshin	Gole waynaha
5.	Xeerka Hay'adda HIV	Akhriska 1aad	Gudidda Arrimaha Bulshada
6.	Xeerarka Guddiyadu diyaariyaan	Akhriska 1aad	Guddiyda

3. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka

4. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
5. Xeeraka ka soo noqda Golaha Guurtida
6. Iyo Wixii kale ee soo kordha

### 1. Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	23 <sup>aad</sup>	21/12/2013	17/02/2014

Kal-fadhigan oo Goluhu qabtey hawlo aad muhiima oo ay ka mid ahaayeen meel marinta Qorshaha Hiigsiga Golaha Wakiilada oo Goluhu ansixiyay, wax ka badalkii Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, Ansixinta Xeerar iyo Xubno ka mid ah Masuuliyiinta Qaran, halkan ayaanu ku soo bandhigeynaa Wax qabadkii Kal-fadhiga 23<sup>aad</sup> oo dhameysitiran si aynu u dardargalino kal-fadhiga 24<sup>aad</sup>.

### 2. Xeerarka Goluhu ka doodey:-

No	Magaca Xeerka	Watkhtiga laga doodey
1.	Qorshaha Hiigsiga G/Wakiilada	<u>27/12/2013</u>
2.	Xeerka Komishanka HIV/AIDSka	20/01/2014
3.	Xeerka Ganacsiga H. Baananka iyo Maaliyada	

### 3. Xeerarka Goluhu Ansixiyey

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyay
	Xeer-Hoosaadka G/wakiilada	02/02/2014	Shirgudonka
2.	Qorshaha Hiigsiga Golaha Wakiilada JSL	31/12/2013	Shirgudonka

#### **4. Motionada Golaha La horkeenay**

<b><u>Motion</u></b>	<b><u>Cida keentay</u></b>
Xeerka Caasimada	23 mudane oo G/Wakiilada ka tirsan
Moshinkii wax ka badalka Xeer-hoosaadka	Mudanayaasl katirsan G/Wakiilada JSL.
Moshinka Muda kordhinta kal-fadhiga 23 <sup>aad</sup>	Mudanayaasha Golaha

#### **5. Masuuliyiinta Goluhu Qaran ee Goluhu Ansixiyey**



<b><u>No.</u></b>	<b><u>Magaca iyo Xilka Masuulka la Ansixiyey</u></b>	<b><u>Xilka Masuulka</u></b>	<b><u>T/la ansixiyey</u></b>
1.	Mr. Shariif Ibraahim Cumar	Xubin Gudidda Cadaalada Qaranka	30/12/2013
2.	Mr. Foosi Maxamed Cali	Xubin Gudidda Cadaalada Qaranka	18/01/2014
3.	Mr. Yuusuf Cabdi Aadan	Xubin Gudida Xuquuqal Insaanka ah	18/01/2014

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

## 6. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey.



No	Masuulka	Warbixinta
1.	Md. Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka W. Qorsheynta	Warbixin ku saabsan Development Fund
2.	Md. C/casiis Maxamed Samaale Wasiirka W. Maaliyada	Warbixin ku saabsan Khasnada Dawlada
3.	Md. Maxamuud Xaashi Cabdi Wasiirka W. Duulista iyo Hawada	Warbixin ku saabsan Xeerka Duulista Madaniga ah
4.	Md. Cabdi Cali Jaamac Agaasimaha K. HIV/AIDSka	Warbixin ku saabsan Xeerka Komishanka HIV/AIDSka
5.	Md. Xuseen Cabdi Wasiirka W. Macdanta iyo tamarta	Warbixin

## 7. Xeerarka Gudiyadu Hayaan

No.	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
	<b>Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Midaynta Cashuuraha</li> <li>• Xeerka Caymiska Qaranka</li> </ul>

Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>

	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency</li> </ul>
	<b>Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud.</li> <li>• Xeerka Xabsiyada</li> <li>• Xeerka Gudidda Aasaaska Komishanka Dib u-habeeynta shuruucda</li> </ul>
	<b>Guddiga Joogtada iyo Anshaxa</b>
	<b>Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose</li> <li>• Xeerka Saxaafada</li> <li>• Xeerka Ciyaaraha</li> <li>• Xeerka Hay'adda HIV/AIDSka</li> </ul>
	<b>Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Argagixisada</li> <li>• Wax kabadelka iyo kaabista Xeerka Diwaangalinta Codbixiyayaasha</li> </ul>
	<b>Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah</b>
	<b>Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka shidaalka (patrolium Act)</li> <li>• Xeerka Macdanta (Miniral Act)s</li> <li>• Xeerka ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha</li> </ul>
	<b>Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa</b>

## **8. Waxqabadka Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada JSL**

### **Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.**

Guddida Joogtadu iyadoo kamasuul ah Golaha inta fasaxa lagu jiro sida uu dhigayo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladu, hadaba intii lagu jiray Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup> waxay Gudididu kulano xog-waran la yeesheen, warbixino kala duwana la dhagaysteen masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan. Sidoo kale waxay Gudidda joogtadu hormood u ahayd furitaankii Xafiisyadii cusbaa e Goluhu ka furtay dhamaan Gobolada Jamhuuriyada Somaliland waxaana ka mid ahaa Masuuliyiinta ay la kulmeen:-

- ✚ Wasiirka Wasaarada Caafimaadka
- ✚ Guddida Mihnadlayaasha Caafimaadka
- ✚ Maayirka Caasimada Hargaysa
- ✚ Maayirka Salaxley
- ✚ Guddoomiyaha Baanka Dhexe
- ✚ Wasiirka Wasaarada Xanaanada iyo Xoolaha

### **Guddida dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyada**

**25/01/2014** waxay Gudidda Dhaqaaluhu Goleweynaha u soo gudbiyeen Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka iyo Maaliyada, iyadoo Gudoomiyaha Gudiddaas **Md. Cumar Sanweyne warbixinta Xeerkaa** Golaha ka hor akhriyay isagoo Xusey iney Xeerka ku soo dareen Wax ka badalkii Gudidda ee Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka iyo Hay'addaha Maaliyada.

**Taariikhdu markey aheyd 27.01.14** ayaa Gudidda Dhaqaalaha Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiila JSL kulan kula yeelatay xafiiskooda qaar ka mid ah madaxda Telesom uu ka mid yahay Gudoomiyaha SAAD-ka mudane C/Raxmaan Aadan Shire, iyo madax kale oo ka mida shirkadaas, waxana shirkaas gudoominayey gudoomiyaha guddida **Mudane, Ahmed Cumar Saleebaan.**

kulankan oo ahaa xog-waraysi lagaga wadahadlay sidii loogu dhaqmi lahaa xeerkaa Bangiga Dhexe ee uu hore Golaha wakiiladu u ansixiyey iyagoo qaar ka mida

xildhibaanadu ay ku doodeen in lacagta adag ee SAAD-ka lagu isticmaalaa ay dhaawacayso lacagtii shilin Somaliland-ta ahayd.

halka ay madaxda shirkadda Telesom-na dhankooda ku doodeen in ay dadwaynaha u hayaan adeeg aad u mihiim ah aduunkana inbadan oo ka mid isticmaasho qaabkan lacagta laysugu xawilayo, sidoo kalena ay diyaar u yihiin in ay lacagta shilin Somaliland-ta ah u isticmaalaan xawilaadda, arrintaas oo ay xildhibaanaduna aad u soo dhoweeyeen.

Waxana ugu dambayntii laysla qaatay in shirkan oo ahaa shir hordhaca aanu ku filayn kulankooda balse ay muhiim tahay in shirar kale loo ballamo, waxaana dib loogu ballamay shir kale oo kan ka wayn maalinta khamiista ah bishuna ay noqonayso 30/01/2014.



**28/01/2014** Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadu waxay kulan kula yeeshay Xafiiskeeda Madax ka socotay baanka Aduunka. Kulankaas oo uu Gudominayey Gudoomiyaha Gudida Dhaqaalaha Maaliyadda Iyo Ganacsiga ee golaha wakiilada **Md. Cumar Axmed Saleban (Sanweyne)** iyadoo waftiga World Bank ka socotey uu ka mid ahaa **Mr. Mike** waxay Gudiddu uga warantey Xeerarka Maaliyada ee ilaa iminka Goluhu ansixiyay iyo kuwa iminka horyaala sida Xeerka Ganaacsig Baananka iyo Hawlaha Maaliyadeed.

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**



**Mr. Mike** oo ka mid ahaa waftiga Baanka Aduunka ayaa Gudidda u sheegay Mudada ay ka shaqeynayaan Somaliland oo ah mudo laba sano ah oo ay la shaqeynayaan Baanka Dhexe isagoo sheegay inay kala shaqeynayaan dhinaca kormeerka (Banking supervision), iminka ay diyaar u yihiin iney Baarlamaanka kala shaqeeyaan Dhinaca Xeerarka Maaliyada

Kulankaas oo ay jooheen tiro 6 Xildhibaan oo ka tirsan Gudidda dhaqaalaha ugu dambeyntiina waxay isku af garteen in kuladama la sii wado lana ansixiyo wixii xeerar maliyeed ah si kor loo qaado dhinaca maaliyadda dalka (somland financial sector).

### **Gudidda Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgalyada**

**26.01.14** waxaa Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca Tababar u qabatey Hay'adda IRI kaas oo ka dhacey Xafiiska Shirarka Gudidyada ee Golaha Wakiilada JSL, waxaana furey tababarkan Gudoomiyaha Gudidda **Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte)** oo ka waramay ujeeda iyo faa'idada tababarkani u leeyahay Mudanayaasha Gudidda si ay ugu fududaato ka midha dhalinta hawlaha shaqo ee Gudidda Arrimaha Gudaha.

Tababarkan oo ku saabsanaa hawlaha ay gudiddu qabato iyo waajibadka ay u xil saran tahay ee la doonayo inay ku hawl galaan sida xeerarka samayntooda, dibu eegista kuwii hore, diyaarinta xeerarka lagu gali doono doorashooyinka soo socda iyo kuwa diwaangalintaba, tababarkan oo maalin kaliya ahaa waxaa bixinayay Masuul sare oo ka tirsan Hay'adda IRI aqoona u leh Hawlaha shaqo ee Baarlamaanada.

**05/02/2014** Gudidda Arrimaha Gudaha Difaaca iyo Nabadgalyadu waxay Kulan kulayeelatey Xafiiskeeda Taliyaha Ciidanka Booliiska **Sareeyo Guuto C/laahi Fadal Iimaan** kulankan oo u jeedadiisu aheyd Xogwareysi iyo isbarasho waxaa Gudoominayay Gudoomiyaha Gudidda Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte) isagoo u

mahad celiyay Taliyaha ciidanka police ka iyo sarkaal kii la socday sida fiican ee ay u soo ajiibeen yeedhmadii ay uyeedheen, sidoo kale na waxa uu iyagana u mahad celiyay xubnaha Gudidda ee kulanka joogay oo ahaa 5 Mudane.

Waxaana Warbixin dheer oo la xidhiidha Shaqada Ciidanka Booliiska ay Gudiddu kaga dhageysatey Taliyaha Ciidanka Booliiska siday wax u wadaan iyo dhamaan amniga guud ee dalka hada halku maraayo oo uu sheegay inay dagan tahay oo ay fiican tahay, waxa uu ku sii daray shaqada police ka iyo hawlaha uu xilsaaran yahay, sida ilaalinta nabadgalyada, ilaalinta dadka iyo wax yaalo kale oo badan.

intaa kadib taliyuhu Xusey hawlgalada ay Ciidanka Police qabteen ay ay kamid yihin sida uu sheegayo taliyuhu inay dhaceen ilaa 6 dil oo intaba ay ciidan ka police ku so guulysteen oo ay soo qabteen dadkii dilka gaystay, sidoo kale ciidan ku ay ka qaybten soo qabashada mukhaadaraad faro badan haday tahay khamri, xashiishad, sidoo kale Ciidanka siiyaan Tababaro iyo aqoon si kor loogu qaado tayadad Ciidanka Booliiska iyo Aqoontooda, waxaa ugu dambeyntii Kulankaa soo Xidhey Gudoomiyaha Gudidda Md. Reyte oo u mahadnaqey mar labaad Taliyaha Ciidanka Booliiska.

**05/02/2014** Gudidda Arrimaha Gudaha Difaaca iyo Nabadgalyadu waxay Kulan kulayeelatey Xafiiskeeda Gudidda Doorashooyinka Qaranka, kulankan oo ku saabsanaa Diiwaangalinta Doorashooyinka iyo sida loo galayo, Waxaa ka soo qeybgaley Mudanayaasha Gudidda oo uu Gudoominayo **Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte)** furitaankii iyo Mahadnaq ka dib.

Gudoomiyaha Gudidda Doorashooyinka Mr. **Ciise xamari** oo ka waranbixiyay halkay wax marayaan iyo siday wax u wadaan, waxa uu sheegay inay wali sharcigii wadaan, waxa kale uu oo sheegay inay wadakulmeen **Donerskii** oo ay wax isla meeldhigeen, waxa kale oo uu sheegay inay jiraan caqabado ay kala kulmeen wasiirka wasaarada Arimaha Gudaha kaas oo sheegay ilaa **civil**

**registration** la sameeyo lama samaykaro **voter registration** taas oo ku keeni karta dib u dhac xaga Wakhtiga

### **Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka**

**09/01/2014** ayay Gudidda Ilaalinta iyo daryeelka Hantida Qaranku kulan la yeelatey Xisaabiyaha Guud ee Qaranka Md. Maxamed Cabdi (Badde) kulankan oo u jeedadiisu aheyd Xogwareysi iyo xogogaal u noqoshada Shaqada Xisaabiyaha Guud(National General Accountant) sida sharcigu dhigayo, wuxuuna Xisaabiyaha Guud Md. Badde ka warbixiyay waxqabadka iyo shaqada Hay'adiisa.

Iyadoo Gabo-gabadiina Gudiddu ka codsatey iney warbixinadii Waxqabad iyo dhaqaale Gudidda u keenaan waxaa Kulankan Gudoomiyahay Gudoomiyaha Gudidda Md. Maxamed Cali Xirsi oo Mahadnaq ka dib kulanka soo gunaanadey.

**09/01/2014** waxay Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka Golaha Wakiilada JSL ay kulan Xogwerysi ah la yeelatey Hantidhowraha Guud ee Qaranka **Md. Maxamuud Aw Cabdi (Maxamuud Dheere)** kulankan oo ka dhacey Xafiiska Gudidda ujeedadiisu waxay aheyd Xogwareysi waxaa Gudoominayay Gudoomiyaha Gudidda **Md. Maxamed Cali Xirsi.**

Hantidhowraha Guud ee Qaranku wuxuu Gudidda warbixin ka siiyay Hawlaha Shaqo ee ay Qaranka u hayaan halkey mareyso isagoo laba arrimood warbixintiisa ku faahfaahiyay kuwaas oo kala ahaa

- ✚ kiis xaga barriga ah oo dhamaan dhukumentigii dawlada nooc kasta la samaystay oo si aan sharci ahayn loo isticmaalay iyo
- ✚ musuqmaasuq ka dhacay mucaawimada hay'ada WFP.

Kulan waxaa ka soo qeyb-galey 4 mudane oo ka tirsan Gudidda Ilaalinta Hantida Qaranka iyo Hantidhowraha Guud oo ay weheliyaan laba xubnoo oo ka tirsan

Hantidhowrka Guud, Sidoo kalena waxay Gudiddu ka codsatay iney u soo Gudbiyaan Warbixinadoodii waxqabad iyo Dhaqaale ee Saddexdii sano ee ugu dambaysay.

Hadaba waxaa dhacdey in Hanti-dhowaruhu aanu wali ka soo jawaabin keenina warbixinadii Dhaqaale iyo Waxqabad ee Gudiddu ka dalbatey iyadoo tiroba saddex jeer Gudiddu waraaqo ay kaga dalbanayaan u qortey Hantidhowrka Guud wuu ka dhaga adeygay wuxuuna soo qorey Waraaqo Nuxurkeedu xambaarsanyahay inaaney Gudidda iyo Baarlamaanku Xaq u laheyn helista Warbixinadaas laga dalbadey, Gudidan Ilaalinta iyo daryeelka Hantida Qaranka tii ka horeysayna ay sidoo kale warbixino ay ka codsadeen ayna ka helin, Gudidu waxay arrinkaa ka soo saareysa Warbixin tafatiran oo ay hada Gacanta ku heyso.

**Gudidu waxay 15/01/2014** kulan la qaadatay Maareeyaha wakaalada biyaha Hargeysa oo ay weheliyaan qaar ka tirsan saraakiisha wakaalada waxa gudida uu uga warbixiyey waxqabadka Wakaalada iyo waxa u qorshaysan, waxa uu warbiximo ka siiyey mashaariicda kala duwan ee ka socota dalka iyo kuwa u qorshaysan ee ay ka midka tahay mashruuca XUNBO-WEYNE, Biyo balaadhinta GEED-DEEBLE iyo mashruuca 16ka milyan ee EURO ku baxayso ee midawga yurub ku qarash garaynayo biyaha Hargeysa oo oo uu dhamaantood sheegay inay meel wanaagsan u marayso waxay gudidu waydiisay su'aalo doora oo ku saabsanaa warbixintiisa iyo cabashada deegaanada qaar ee aan biyaha helin.

Gudidu waxay maareeyaha ka dalbatay inuu u soo gudbiyo warbiximihii dhaqaale iyo waxqabad ee 3dii sano ee dhamaaday waanu u balan qaaday Nasiib wanaagna wuu u soo gudbiyey gudida warbiximihii ay ka dalbadeen.

**15/01/2014** waxay Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranku kulan la yeelatey Gudoomiyaha Gudidda Qandaraaska Qaranka, kulan oo ka dhacey Xafiiska Gudidda ee Golaha Wakiilada waxaa Gudoominayay Gudoomiyaha Gudidda **Md. Maxamed Cali Xirsi** iyadoo Mudanayaasha Gudida 5 ka mid ahi ka

qeyb gashey Shirkan halka Gudidda Qadaraaska Qaranka uu Gudoomiynayay Gudoomiyaha Gudiddaas **Md. Aadan C/laahi Xasan.**

Kulanan oo ujeedadiisu aheyd Xogwareysi ay Gudidu ka xog wareysaneysay Gudidda Qadaraaska Qaranka Shaqada ay Qaranka u hayaan iyo Wax qabadkoodii, wuxuu Gudoomiye Aadan C/laahi Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka uga Warbixiyay hawlaha shaqo ee Gudidiisa iyo Wixii u qabsoomey intii ay xilka hayeen iyo waliba shaqadooda Qandaraaska Qaranku sidey u socoto, ugu dambeyntii waxaa fadhigaa soo xidhey Gudoomiye Md. Maxamed Cali Xirsi oo mahadnaqey ka soo qeyb-galayaashii Shirkaas.

Iyadoo sidoo kale Gudidu ka dalbatey Gudidda Qandaraaska Qaranka iney u keenaan warbixinada Waxqabadkii iyo dhaqaale ee saddexdii sano ee la soo dhaafey iyagoo ka aqbaley, inkastoo laba jeer oo ka dambeeyay ay Gudiddu u qortey Waraaqo ay kaga dalbanayaan kamey soo Jawaabin Gudiddu Qandaraaska Qaranku wali.



**Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka** Golaha Wakiiladau Taariikhdu markey aheyd **29/01/2014** waxay kulan Xogwareysi la yeelatey Maareeyaha Guud ee Televisionka Qaranka Md. Khadar Cali Gaas, Kulankan oo Md. Maxamed Cali Xirsi Gudoomiyaha Gudidu uu Hogaaminayay waxaa ka soo qeyb-galey 5 Mudane oo Gudidda ka tirsan waxaan Maareeyaha Televisionka Qaranku warbixin ka siiyay siday u socdaan hawlaha shaqo ee Tvgu iyo wax

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

qabadkooda guud sida wixii u qabsoomey iyo waxyaabihii uu soo kordhiyay intuu Xilka hayay iyo sidoo kale waxyaabaha u qorsheysan.

Warbixinta ka dib waxay Mudanayasha Gudidu su'aalo ka waydiiyeen Maareeyaha waxyaabo badan oo khuseeya Shaqadiisa, Waxaana Gudoomiye Md. Maxamed Cali Xirsi uu ugu dambeyntii u mahadnaqey Maareeyaha sida uu u soo ajiibey kulankan isagoo sidoo kale u mahadnaqey ka soo qeybgalayaashii kale kulankii sidaa ku soo xidhey.

**Gudidu waxay sidoo kale 29/01/2014** kulan la qaadatay Maareeyaha Madbacada Qaranka waxaanu warbixin kooban ka siiyey shaqada madbacada iyo horumarka ay samaysay, iyagoo xubnaha gudidu su'aalo ka waydiisay sababaha ilaa hada shaqaalaha madbacada grades loogu samayn waayay iyo waxa ilaa hada ka hortaagan inay hoos tagaan Haayada Shaqaalaha Dawlada dhamaan suaalihii gudidu waydiisay wuu ka jawaabay waxaanay gudidu ka codsatay inuu warbixinadii u soo gudbiyo 3dii sano ee u danbeeyey waxaanu u qornay laba qoraal oo kala danbeeyey midnabana gudida kumuu soo celin wax jawaab ama warbixina.

**Gudoomiyaha Haayada Shaqaalaha Md. Nuux Sh. Muuse Ducaale** ayay Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranku la kulantey **30/01/2014**, kulankan oo Gudoomiyaha Gudiddu Hogaaminayey waxaa Warbixin ka siiyay Gudoomiyaha Ha'ayadda Shaqaalaha Hawlaha Shaqo ee ay Qaranka u hayaan isagoo sheegay iney ka mid yihiin 4 hay'adood ee Madaxbanaan ee Qaranku leeyahey Masuul ay ka yihiin Shaqaalaha Guud ahaan hadey tahay Dalacaadood iyo tayeyntooda, wuxuuna welwel ka muujiyay dadka ajaanibka ah ee dalka ku so badanaya oo shaqooyinkii buuxiyay iyadoo ay jiraan muwaadiniin badan oo Aqoon iyo khibradba u leh shaqooyinka ay hayaan.

Wuxuu Gudoomiyaha hay'ada shaqaaluhu warbixin dheer ka siiyay Gudidda Shaqaalaha Dawlada isago digniin u direy dhamaan hay'adda dawladu iney

qaataan shaqaale aan joogta aheyn isla markaana aaney waxba ka ogeyn Hay'adda Shaqaaluhu, ugu dambeyntii Gudiddu waxay u mahadnaqdey Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha, Gudiduna waxay ka codsatay Hay'adda Shaqaalaha iney sidoo kalena iyaguna u keenaan Warbixnadii Waxqabad iyo dhaqaale ee Hay'adda Saddexii sano ee u dambeysay ugu dambeyna sidaana Gudoomiye **Md. Maxamed Cali Xirsi** uu kulankii soo xidhey.

**Gudidu waxay 30/01/2014** Xafiiska Gudida kulan xogwaraysi kula yeelatay **Maareeyaha Haya'dda Korontada** Dawlada oo ka xaal waramay guud ahaan xaalada wakaalada Korontada Caqabadihii haystay guulaha ilaa hada ay gaadheen qorshooda dhow iyo sida ay la tahay in kor loogu qaadi karo tayada iyo tamarta korontada Dawlada.

Gudida ayaa waxay ka codsatay Maareeyaha Haayada Inuu u soo gudbiyo warbixin sanadeedyadii dhaqaale iyo wax qabad ee 3dii Sano ee u danbeeyey, waanu u soo gudbiyey warbiximahaa aanu ka dalbanay gudidda.

### **Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo xuquuqal insaanka**

Gidida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka iyadoo gudanaysa waa jibaad keeda shoqo ee Golaha wakiilada ay u hayso waxay talobixin ka soo jeediyeen Labada xubnood ee Gudida Cadalaada oo kala ahaa

1. Mr. Shariif Ibraahim Cumar
2. Mr. Foosi Maxamed Cali



Waxaa kale oo ay gudidu talo see jeedin ka samaysay xubinta komishanka xuquuqal insaanka taas oo Goluhu ansiyay xubintaas oo ah:-

1. Mr. Yuusuf Cabdi Aadan

## **9. Gudiyada Gaar ah (Adhoc Committee)**

### **Gudidii Gaarka aheyd ee loo saaray Wax ka badalkii Xeer-hoosaadka**

#### **Golaha Wakiilada**

Waxaa **04/01/2014** Gudi gaar ah loogu soo saarey Wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada sida lagu Ansixiyay Qorshihii Hiigsiga Golaha Wakiilada Gudidaas oo ka kooban 3 shir-gudoonka, 8 Gudoomiye Gudi iyo Mudanayaal kale waxayna kala ahaayeen **Md. Baar Siciid Faarax, Cabdi Maxamed jaamac, Cali Sh. Ibraahim Aareye iyo Xamze Maxamed Gaadaweyne**

#### **Gudidii ka soo talo-bixinta isku deygii Dil ee Md. Qabile**

Waxaa Gudi Gaar ah loo saarey **29/12/2013** isku daygii dil ee Xildhibaan Maxamed Faarax Qabile si ay uga soo talo-bixiyaan waxayna Gudiddaasi ka koobneyd Xubnahan soo socda:-

1. Md. C/raxman Maxamed Jaamac
2. Md. Ibraahim Jmac Cali (Rayte)
3. Md. Maxamed Saalax Cige
4. Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne
5. Mr. Mustafe Maxamed X. Dahir (Lataliyaha sharcigaa)

#### **Gudidii ka soo talo-bixinta Xeerka Komishanka HIV/AIDSka:-**

1. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac (Xoog)
2. Md. Ibraahim Caraale Cabdi
3. Md, Xassan Muuse Hufane



4. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac
5. Mr. Mustafe Maxamed X. Dahir (Lataliyaha sharcigaa)

## **10. Xafiisyada Gobolada laga furey**

Golaha Wakiiladu waxay xafiisyo ka furteen dhamaan Gobolada Dalka marka laga reebo Caasimada oo ay Xarunta Golaha Wakiiladu ay ku taalo, Xafiisyadan oo dhamaantood Hay'adda **UNDP** gacan ka siisay kana caawisay qalabayntooda.

### **Xafiiska Gobolka Awdal**



Taariikhdu markay ahayd **17/03/2014** Guddida Joogtada & Anshaxa oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Guddida Joogtada ah ee G/Wakiilada **Md. Mahdi Ibrahim Buubaa** Waxay xafiis cusub ka fureen Gobolka Awdal oo noqday Gobolkii ugu horeeyay ee laga furo xafiis isku xidhi doona Mudanayaasha Golaha wakiilada ee laga soo doortay Gobolka Awdal iyo dadweynihii soo doortay.

Waxa xafiiskaas lagu qabtay xaflad lagaga hadlayo mihiimada xafiiskani u leeyahay dadweynaha Reer Awdal oo noqonaysa inay kula kulmaan Masuuliyiinta

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

ay soo doorteen, wixii talo iyo tussaale ahna ku soo kordhiyaan. Sidoo kale, Badhasaab ku xigeenka, Maayirka xigeenka Gobolka Awdal iyo Gudidda Joogtada ee Golaha Wakiiladu waxay si wadda jir ah u dhagax dhigeen Xarun cusub oo uu yeelan doono G/wakiilada JSL mustaqbalka.

## **Xafiiska Gobolka Saaxil**



Taariikhdu Markay ahayd **25/03/2014** .Xildhibaanada Golaha Wakiilada ee Guddida joogtada oo uu hogaaminayo Gudoomiye ku xigeenka Labaad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Yuusuf Axmed** waxay fureen xadhigana ka jareen xafiiskii labaad ee Golaha Wakiiladu uu ku Yeelan doono Gobolka Saaxil.



Sidoo kale waxay dhagax dhigeen xurun cusub oo uu Golaha Wakiiladu Ku yeelan doono Gobolka Saaxil mustaqbalka, si ay ugu shaqeeyaan Dadweynihii

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

Soo doortay mudda Goluhu fasaxa ku jiro. Ugu dambayntiina waxay shahaado sharaf siiyeen masuuliyiinta Gobolka Saaxil oo kala ahaa **Gudoomiyaha Gobolka Md. Cali Maxamed Cilmi, Duqa Magaalada Md. C/Shakuur Maxamuud Xasan (Cidin), Maareeyaha Dekada Eng. Cali Cumar Maxamed (Cali Xoor xoor) iyo Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose ee Magaalada Berbara Md. Suhayb Maxamed Cali.** Kuwaas oo xildhibaanadu Ugu mahad naqeen kuna amaaneen sida wada jirka ah ee ay xil-gudashadooda waajibka ah uga soo baxeen.

### **Xafiiska Gobolka Togdheer**



Taariikhdu markay ahayd **26/03/2014** Gudoomiye ku xigeenka Labaad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Yuusuf Axmed** oo ay wahelinayeen xildhibaadnada Guddida Joogtada ee Golaha Wakiilada ayaa si rasmi ah xadhiga uga jaray xafiiska saddexaad ee Gobolka Togdheer.



Sidoo kale waxa lagu wareejiyay shaqaalaha ka shaqayn doona xafiisyada Gobolada Xeerar (hard copy) ah oo ka kooban ilaa 30 Xeer. Looguna talagalay in bulshada Goboladaasi ay si sahlan u heli

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup>**

karaan xeerarka Golaha wakiiladu ansixiyeen ayna la socdaan xeerarka ka ay soo saaraan Goalaha Wakiiladu.

## **11. Gudoomiye Xigeenka Labaad Dr Cali Yusuf Axmed oo Wufuud la kulmey**

Waxaa xarunta Golaha wakiilada JSL yimiday Wafti ka socda Sweden oo ay hogaaminaysay Xil dhibaanaad ka tirsan xildhibaanaad Dalkaas iyo Afar Xubnood oo kale kala ah:-

Xildhibaan ka socda Dowlada Hoose, Qoraa Cilmi baadhiseed, Joornaalis iyo Dhakhtar waxaana xarunta Golaha wakiilada Ku la kulmay Gudoomiye Xigeenka labaad ee Golaha Wakiilada Mudane **Dr Cali Yuusuf Axmed** waxyaaba ay ka wada hadleena waxaan ka mid ahaa sidii ay xog-ogaal uga noqon lahaayeen arimaha Somaliland oo uu Gudoomiyuhu uga waramay.

Waxaa kale oo ay kawada hadleen intuu uu Golaha wakiiladu jiray marka laga soo bilaabo 1991 ilaahada wixii u Qabsoomay iyo Qorshayaasha Mustaqbalka ee Baarlamaanku Hiigsanayo iyo dimuquraadiyada ay Somaliland ku caano maashay heerkaana ay ku gaadhay nabada iyo Xasiloonida ay ku naaloonayso oo uu Gudoomiyuhu faahfaahin uu ka siiyay waftiga.

Dhanka kale waxaa uu gudoomiyuhu war bixin aad u dheerayd ka sii yay Doorashooyinka kii Somaliland u Qabsomay iyo sida ay u qabsoomeen oo run ahaantii ahaa wax lagu faani sida qiimaha iyo qadarinta leh ee ay inoogu qabsoomeen oo waftiguna inoo qiray sida waxnaag san ee ay u qabsoomeen doorashooyinkii ina dhaafay, iyadoo ay ka wadda hadleen doorashooyinka soo socda mustaqbalka ee la filayo in ay qabsooman.

Waxaa kale oo uu Gudoomiye Dr Cali Yuusuf Axmed uu La kulmay Masuul Ka socda UNDP oo qaabilsan Baarlamaanada Somaliland Iyo Somalia waxyaabaha ay ka wada hadleena waxaaka mid ahaa sidii ay nooga kaalmayn lahaayeen sigaar ah aqoon korodhsiyada Xidhibaanaad iyo Shaqaalaha Baarlamaanka waxaa kale oo

aan isla soo qaadnay in gudi Hoosaadyada Golaha wakiilada loo sameeyo Safaro Aqoon karodhsi oo dibada ah.

Waxaa kale oo uu lakul may Gudoomiyuhu **Mr PERHINDGARAD** oo ah Ambassador and senior Advisor (Horn Of Africa) isaga oo aqoon dheeraada u leh Geerska Africa safiirna ka soo noqday dalalka Sudan, Ethiopia, iyo Kenya isla markaana Aqoon balaadhan u leh Somaliland iyo Somalia.

Wayaaba ay ka wada hadleen Mr Perhindgarad waxaa ka mid ahaa Gooni isku taaga Somaliland iyo siyaabaha ay u doonayso Somaliland aduunyada inteeda kale iyo ilaa hada wixii u Qansoomay

## **12. Mahadhooyin**

Ka dib markii Golaha Wakiilada JSL uu soo kala dhexgaley Khilaaf iyo Muran ka soo bilawday isku-shaandheynta Gudiyada Golaha isuna bedelay in la gaadho Marxalad Xaasasiya oo dib loo qaban Karin ayaa Golaha Guurtidu ka Codsadey in maalintii ay bishu aheyd 08/ 02/2014 iney dib u dhigaan fadhigoodii taas oo uu ka aqbaley.

Khilaafkaas oo sii kordhey ayay Golaha Guurtida ula muuqatey in la dhexdhexaadiyo oo la isku dayo in la isku soo dhoweeyo dhinacyada iyadoo la codsadey in la xakiyo fadhiyada Golaha oo dib loo dhigo mudo toddobaaad ah Maalintii 10/02/2014.

Labada dhinac ee iska soo-horjeedda ee Golaha Wakiilada ayaa ka codsaday Guddigii dhex-dhexaadinta ee Golaha Guurtida in loo daayo arrinta labaddooda dhinaca lana siiyo wakhti ay wadahal ku sameeyaan, iyadoo Isku-daygii labadda dhinac ee Golaha Wakiiladda kama ay soo bixin natiijo iyo is af-garad waxayna Guddigii Golaha Guurtidda dib uga soo celiyeen arrinkii 15/02/2014.

Haddaba, Guddigii Golaha Guurtida ee Dhex-dhexaadinta markii uu waraystay labadii dhinaca Guddiyaddoodii 16/02/2014, kana xog-wareystay bal waxay isku hayaan ee khilaafka dhaliyay iyagoo is hor-fadhiya, isla markaana laga saxeexay kalsooni buuxda

Hadaba 17/02/2014 ayuu Golaha Guurtidu u soo gudbiyay Qoraal uu ku dhex dhexaadinayo labada dhinac kaas oo ka kooban 3 Qodob dhinac walbana uu ku qancey aqbaleyna, wuxuuna u dhiingaa qoraalka garqaadista ahi sidan:-

1. *In aqlabiyada Xilka laga qaadi karo Gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen oo shir-gudoon si isku ah ay noqoto kala badh iyo hal oo ah (absolute majority) 42 xubnood tirada guud ee Xubnaha Golaha Wakiilada marka ay soo jeediyaan saddex meeloodow meel (1/3 oo ah 27 mudane tirada Guud ee Xubnaha Golaha Wakiilada jsl).*
2. *In shir-gudoonka oo ah Gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen aan la soo dhigi Karin Moshin xil ka xayuubin ah mudada xilka Golaha uga hadhsan, hadaaney xilkooda u gudanwaayin si waafaqsan Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada iyo Dastuurka Qaran JSL.*
3. *In Gudoomiyuhu ku dhawaaqo xidhitaanka kal-fadhiga 23<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada, isla fadhigan maantana Goluh galo fasixiisii caadiga ahaa..*

Intaa ka dib Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu JSL Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro) isagoo ku hadlaya Afka Golaha Wakiilada JSL wuxuu Mahadnaq balaadhan u soo jeediyay Odayaasha Golaha Guurtida Doorkan weyn ee ay ka qaateen Xalinta khilaafkaas, isagoo sheegay inay Aqabaleen Go'aanka dhex-dhexaadinta ah isla markaa raaligalin u direy Shacabka Somaliland Muranka iyo Khilaafkaas Golaha Wakiilada hadheeyay Fadhiyadii u dambeeyay, Wuxuuna Gudoomiyuhu Sidaa ku soo xidhay Kal-fadhigii 23<sup>aad</sup> isagoo sheegay inuu Goluhu galayo fasax 8 toddobaad ah.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---